Waxbarashada iyo tababarka

Xirfadahee dheeraadka ah ayaad u baahantahay si aad u hesho shaqadda aad doonayso? Eductus waxaa la dhisay 1991 oo haddana waa mid ka mid shirkaddaha waxbarashada dadka waa wayn ee ugu wayn Iswiidhan. Waanu oganahay waxa habboon!

Waxaanu ku bixinaa koorsooyinka Af Iswiidhish. Iswiidhishka Muhaajiriinta (SFI), Iswiidhishka sidii Luqadda Labbaad (SAS) iyo Iswiidhishka Tababarka Xirfadda.

Haddii aad ka diiwaangashantahay Arbetsförmedlingen (Adeega Shaqadda ee Dad waynaha), waxaad yeelan doontaa fursadda aad isugu diiwaangeliso mid ka mid ah koorsooyinkayaga tababarka xirfaddaha. Waxaanu bixinaa Komvux (waxbarashada dadka waa wayn) koorsooyin iyo tababaro. Waxaanu bixinaa waxbrasho labbadaba bilow iyo heer dhexe ah.

Komvux – waxbarashada bilowga ah ee dadka waa wayn

Dadka u baahan in ay ku daraan waxbarashadooda heer bilow ah oo helaan xirfaddaha horumarka heerka waxbrashada dhexe.

Waxa ku saabsan koorsooyinka

Waxbarashada bilowga ah ee dadka waa wayn waxa qayb ka ah qaadashada koorsooyin heer bilowa ah (dugsiga khasabka ah). Koorsooyinku waxaa lagu dabaqi karaa nooca waxbarashada ay siiyaan waxbarida khasabka ah ee gudaha Iswiidhan carruurta ku jira sanad dugsiyeedka 1-9 (da’daha 7-16). Si kastaba ha ahaatee inta

ay ka koobantahay iyo dhismaha koorsooyinka waxaa loo qaabeeyay dadka waa wayn. Waxaa lagugu dhiiri gelin doonaa in aad u shaqaysid si madax banaani badan leh oo aad qaado masuuliyada daraasaadkaaga. Waxaad qaadan kartaa koorsooyin heer wakhti buuxa ama nus gelin ah, muddada maalintii ama fiidkii. Qaado bedelka aadka adiga kuugu habboon! Qaado koorso keliya ama dhowr maadooyin ah isku mar. Waxaad ku dari kartaa labba daraasadood nooyco kale oo ah koorsooyinka waxbrashada dadka waa wayn (waxbarasada dadka waa wayn iyo SFI) iyo shaqo ama tababar shaqo lagu qaato. Ujeedooyinkaaga waxbarasho waxaa go'aamiya heerkayaga jira ee aqoonta. Waxaad heli doontaa taageero iyo hagitaan tababar xirfadeed ah oo kaa caawin doona in aad qorshayso qorshe waxbarasho ku habboon baahiyahaaga. Koorsooyinka waxbarashada bilowga ah wax kharash ah ma laha; waa lacag la'aan. Waxa keliya ee aad u baahantahay waa buuggaagtaada waxbarashada iyo agabka kale ee waxbarasada.

Maxay waxbarashada dadka waa wayn ee bilowga ahi ku hogaamin doontaa?

Koorsooyinku waxay adiga ku siin doonaan xirfadaha aad u baahantahay in aad ka qab gasho bulshadda iyo noloshaa shaqadda, oo waxay awood kuu siin doontaa adiga in aad ka horumarto warbarasho dheeraad ah oo heerka dhexe ah.

Sideen u codsadaa kooraska waxbarashada bilowga ah ee dadka waa wayn?

La xidhiidh adeega waxbarashada dadka waa wayn ee agtaada ah wixii xog ee dheeraad ah iyo sida loo codsado iyo shuruudaha u qalmidda. Habka codsigu had iyo jeer waxaa lagu fuliyaa iyaddoo la maraayo degmadda aad ku nooshahay.

Yaa loogu talo galay koorsooyinka waxbarashada dadka waa way nee bilowga ah?

Waxaad isku diiwaan gelin kartaa koorsooyinka waxbarashada dadka waa wayn:

- Laga bilaabo 1 Juulay sanadka aad gaadho da'da 20.
- Haddii ay kaa maqantahay xirfaddaha ay carruurta iyo dadka dhalin yarta ahi helaan muddada ay ku jiraan waxbarashada khasabka ah.
- Haddii aad ku nooshahay Iswiidhan oo aad ka diiwaangashan tahay degmo.

Koorsooyinka waxbarashada bilowga ah ee dadka waa wayn

Dhammaan waxbarashadayada bilowga ah (Ogow: Hadda waxaa lagugu jihayn doonaa boggag Af Iswiidhish ah)

Komvux – Waxbarashada Dhexe ee dadka waa wayn

Waxbarashada dadka waa wayn ee dhexe waxaa loogu talo galay dadka doonaya in ay kordhiyaan heerka waxbarashadooda dugsiga sare oo ay helaan takhasus si ay awood ugu yeeshaan iyaga in ay horumaraan si ay hore ugu wadaan waxbarashada ama tababarka xirfadeed.

Waxa ku saabsan koorsooyinka

Waxbarashada Dhexe ee dadka waa wayn waxa ay ku lug leedahay qaadashada koorsooyinka heerka dhexe. Koorsooyinka waxaa lagu dabaqi karaa nooca waxbarashada lagu bixiyo goobta jimicsiga (dugsiga sare) gudaha Iswiidhan, si kastaba ha ahaatee, dhismaha koorsooyinka waxaa loogu qaabeeyay dadka waa wayn. Waxaa lagugu dhiiri gelin doonaa in aad u shaqaysid si madax banaani badan leh oo aad qaado masuuliyada daraasaadkaaga. Waxaad qaadan kartaa koorsooyin heer wakhti buuxa ama nus gelin ah, muddada maalintii ama fiidkii. Waxaanu bixinaa koorsooyin gaar ah ama qaar isku dhan. Ujeedooyinkaaga waxbarasho waxaa go’aamiya heerkayaga jira ee aqoonta, oo waxaad go’aamisaa socodka aad rabto in aad ku shaqayso. Waxaad heli doontaa taageero iyo hagitaan tababar xirfadeed ah oo kaa caawin doona in aad qorshayso qorshe waxbarasho ku habboon baahiyahaaga. Koorsooyinka waxbarashada dadka waa wayn wax kharash ah maaha; waa lacag la’aan. Waxa keliya ee aad u baahantahay waa buuggaagtaada waxbarashada iyo agabka kale ee waxbarasada.

Waxbarashada dadka waa wayn ee dhexe waxay ka koobantahay:

- Koorsooyin guud oo dhigaal ahaan ah
- Koorsooyinka tababarka xirfaddaha ee dhexe (koorsooyin gaar ah iyo koorsooyin isku dhan)
- Goobaha la tababaraha

Maxay waxbarashada dadka waa wayn ee dhexe ahi ku hogaamin doontaa?

Waxbarashada dadka waa wayn ee dhexe waxay ku siin doonaa fursadda si aad u hesho darajooyin waxbarashada dhexe ah. Tani waxay kuu ogolaan doontaa in aad ka horumarto waxbarasho dheeraad ah kulliyada tababarka xirfadeed, kulliyada ama jaamacad. Kooraska waxbarashada dadka waa wayn ee dhexe sidoo kale waxa ay kordhisaa fursadahaaga helidda shaqo.

Sideen u codsadaa kooraska waxbarashada dadka waa wayne ee dhexe?

La xidhiidh adeega waxbarashada dadka waa wayn ee agtaada ah wixii xog ee dheeraad ah iyo sida loo codsado. Habka codsigu had iyo jeer waxaa lagu fuliyaa

iyaddoo la maraayo degmadda aad ku nooshahay.

Yaa loogu talo galay waxbarashada dadka waa wayn ee dhexe?

Waxaad isku diiwaan gelin kartaa koorsooyinka waxbarashada dadka waa wayn ee dhexe:

- Laga bilaabo 1 Juulay sanadka aad gaadho da’da 20.

Si aad ugu qalanto waxaad u baahantahay:

- La’aanta dhammaan ama qayb xirfaddaha lagu bixiyo koorsada.
- Faa’iido la fili karo oo laga helo kooraska.

Koorsooyin waxbarashada dadka waa wayn ah oo dhexe

Dhammaan koorsooyinka waxbarashadayada dhexe iyo tababarka (Ogow: Hadda waxaa lagugu jihayn doonaa boggag Af Iswiidhish ah)

Tababarka xirfadeed

Ka hel xirfadda aad u baahantahay si aad u soo jiidato dareenka loo shaqeeyayaasha mustaqbalka! Xirfadahee dheeraadka ah ayaad u baahantahay si aad u hesho shaqadda aad doonayso? Waxaanu bixinaa dhowr koorsooyin tababar xirfaddeed oo kala duwan.

Ma tahay qof aan shaqo haysan ama khatar ugu jira in uu shaqadda waayo?

Ka dib waxaad u qalantaa in aad barrato koorso tababar xirfaddeed ah. Ujeedada koorsadu waa in ay kaa caawiso in aad shaqo hesho, marka ay sidoo kale siinayso loo shaqeeyayayasha dad leh xirfaddaha ku habboon. Koorso tababar xirfadeed waa koorsada xooga saarta xirfaddaha tababarka shaqo oo waxaa lagu bixiyaa iyaddoo la metalayo Arbetsförmedlingen (Adeega Shaqadda ee Dad waynaha), laakiin ay bixiso waxbarasho iyo shirkad tababar sida anagoo kale ah. Noocyada koorsooyinka la bixiyo iminka waxay ku xidhan yihiin dhammaanba xaaladda hadda ee suuqa shaqada. Tababarayaashayadu waxayw ax kugu barayaan hab aad adiga kuugu habboon, si ay kaaga caawiyaan in aad ku guulaysato koorsadaada. Had iyo jeer waxaanu ka bilownaa heerkaaga aqooneed ee jira. Ujeedadayadu waa in aanu ka dhigto jidkaaga ilaa shaqada mid u degdeg badan sida suuragalka ah.

Yaa isku diiwaan gelin kara koorsooyinka tababarka xirfaddeed?

Haddii aad ka diiwaan gashan tahay Arbetsförmedlingen (Adeega Shaqadda ee Dad waynaha), waxaad yeelan doontaa fursadda aad isagu diiwaan geliso koorsada. La falanqee shaqaalaha kiiskaaga jooga xaga Arbetsförmedlingen!

Ma jiraa wax taagero lacageed oo la heli karo?

Waxaa dhici karta in aad xaq u yeelato kobcinta lacag taageero ah (utvecklingsersättning) ama deeqda hawsha (aktivitetsstöd). Försäkringskassan (Wakaaladda Caymiska Bulshadda) ayaa go’aamisa deeqahan.

Eductus waxaanu bixinaa koorsooyinka tababarka xirfadeed ee soo socda

Haddii aad tahay qof shaqa doon ah oo aad ka diiwaan gashantahay Arbetsförmedlingen waxaad awood u yeelan doontaa in aad iska diiwaan geliso koorsooyinkan Eductus:

- Bilowga koorso Ganacsi
- Tababarka xirfaddeed ee Iswiidhishka

Dhammaan koorsooyinkayaga tababarka xirfaddeed (Ogow: Hadda waxaa lagugu jihayn doonaa boggag Af Iswiidhish ah)